

**SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 1063 THRU
THE BOOK OF AMOS**

9:15-INTRO II PETER 1:1

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub. Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal casharradii aynu ka soo xiganaynay kitaabkii Caamoos oo ahaa nin Ilaah farriin ugu soo dhiibay boqortooyadii woqooyi xilli ay ku baraareen hawlahooda, laakiin haddana ay Ilaah ka dheeraadeen.

Caamoos ma ahayn nin la mid ah culimadii waxbaratay ee wakhtigiisa, wuxuuse ahaa nin uu ka dhex shaqaynayno Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah. Mar uu la hadlayey Dadka reer binu Israa'iil ayaa nebigu wuxuu iyaga garansiinayaa waxa ku soo socda oo ah in magaalada la burburin doono.

Wuxuuse u sii sheegayaa in dembiyadooda aawadood Ilaah burburin doono magaalada Beytal. Intiise aan burburku ku dhicin qaranka ayaa waxaa dadkii lagu wargelinayaa inay Ilaah u soo leexdaan si bal wax un uga badbaadaan. Waxyaabaha nebigu kula hadlayo reer binu Israa'iil waa waxyaabo caam ah oo khuseeya qaran waliba.

Wuxuuna leeyahay, sida ku qoran kitaabkii Caamoos 5:14-15, waxaana nebiga uu leeyahay, iyadoo Ruuxa Qoduuska ahi ka dul hadlayo,

"Wanaagga doondoona, sharkase ha doondoona, aad noolaataane, oo sidaasuu Rabbiga ah Ilaaha Ciidammadu idiinla jiri doonaa sidaad u tidhaahdeen. Sharka nebcaada, oo wanaagga jecclaada, oo caddaalad iridda ku sameeya, waayo, waxaa suurtoowda in Rabbiga ah Ilaaha ciidammadu uu u roonaado kuwa reer Yuusuf ka hadhay."

SONG: REEL-----CUT-----

Markii noogu dambaysay waxaannu ku jirnay dabayaaqada cutubkii 9aad ee kitaabkii nebi Caamoos, waxaanan soo aragnay qayb ka mid ah waxyiyaada mustaqbalka marka Ilaah xukunkii ku soo degay reer binu Israa'iil uu ka qaadi doono. Waa marka reer binu Israa'iil ay ku soo noqon doonaan dhulkooda iyaga oo dhan, waana Masiixa kan boqortooyadiisa ka taagi doona dalka Israa'iil, oo waxaa looga talin doonaa dhulka oo dhan.

Waa maalin dadka ay heesi doonaan heeskii caanka ahaa: **"Maanta maanta, maanta, waa maalin weyne maanta. Maanta, maanta, maanta, Madaxeen bannaane maanta. Maanta, maanta, maanta, waa mahad Ilaah e maanta. Maanta, maanta, maanta, madaxeen bannaane**

maanta." Waa hees ku habboon in la qaado maalinta Masiixu dunida uu ka talinayo, oo uu boqortooyadiisa majaraha u taago. Waayo ma jiri doonto, xasuuq, gummaad, gumaysi, faqri, cudurro iyo weliba caddaalad darro.

Si kastoo qofku xor u yahay maanta, haddana waa lama huraan in dadku la kulmaan caddaalad-darro, iyo eex iyo weliba xasuuq. Waxaana ugu wacan in Masiixa boqortooyadiisu ay dhimman tahay. Markii boqortooyadu ay timaaddo dunida, waxyaabahaasi oo dhan dunida laguma arki doono, taladana waxaa gacanta ku haysanaya Masiixa

Ilaah.

Waxaana Sabuurlaha oo arrintaas ka hadlayaa arrinkaasi isaga ah uu leeyahay sida ku qoran Sabuurka 98aad, ee uu tiriyey nebi Daa'uud oo ahaa addoonkii Rabbiga, markaasoo uu lahaa: **"Wuxuu dunida ku xukumi doonaa xaqnimo, dadyowgana caddaalad."** Haddaan barnaamijkaan ku soo noqonno, wuxuu nebi Caamoos leeyahay, **"Oo anigu waxaan soo celin doonaa maxaabiistii dadkayga Israa'iil, oo iyana way dhisi doonaan magaalooyinkii baaba'ay, wayna degi doonaan."** Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka 9aad, ayaannu haatan idiin akhriyeynaa aayadda ugu dambaysa cutubka 9aad, iyo weliba kii nebi Caamoos, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan: **"Oo Rabbiga Ilaahaaga ahu wuxuu leeyahay, Waxaan iyaga ku beeri doonaa dalkooda, oo mar dambena lagama rujin doono dalkooda aan siiyey."** Markii Ilaah iyaga dhulka uu ku soo celiyo, waxay halkaasi joogayaan weligood, oo Ilaah wuxuu leeyahay, **"Oo mar dambe iyaga halkaas lagama rujin doono."**

Waana wax Ilaah uu hirgalin doono. Marka kowaad wuxuu soo cusboonaysiinayaa ama taagayaa macbudkii nebi Daa'uud ee dhacay iyo boqortooyadii nebi Daa'uud. Haddaba yaa boqor ka noqonaya Israa'iil wakhtigaas?

Tan labaad ee la arkayo markii wakhtigaasu yimaado ayaa waxay tahay in reer binu Israa'iil kol dambeeto aanay qaramada midoobay xal ka raadin doonin, waxayse hor-joogaysaa Ilaahii uumay, oo ninna uma goodin doono ama hanjabi doono. Tan saddexaad ee wakhtigaas la arki doonana waxaa weeye, Hanuun badan oo quruumaha ku soo degi doona.

Maxaa wacay waxaa dunida ka talinaya Ciise Masiix oo isagu ah Boqorka, oo wuxuu dhanka hooyada ka soo farcamay boqor Daa'uud. Haddaan waxyiyaadii nebiga iyo faalladii gaabnaydba intaas ku soo koobno, ayaannu u guda-gelaynaa kitaabka Axdiga Cusub. Sida caadada inoo ahaan jirtay, markii dhegaystayaal hal kitaab aan dhammayno, waxaan galnaa kitaab kale. Markii hal kitaab oo Axdigii hore ah dhammayno, ayaannu idiin bilownaa mid Axdiga Cusub ah, waxaanan caaway idiin bilaabaynaa haddaba:

HORUDHACA WARQADDII LABAAD EE RASUUL BUTROS

Simoon Butros waa qoraha Warqaddan Labaad sida ku qoran isla Warqaddan Labaad 1:1, waxaana qoran sidatan: **"Anigoo ah Simoon Butros, oo addoon iyo rasuulba u ah Ciise Masiix, waxaan warqaddan u qorayaa kuwa helay Iimaan qaali ah oo keenna la mid ah."** Warqaddan inuu qoray Butros iyo in kale ayaa waxaa ka jirta dood weyn. Nin la yiraahdo Ditoor Mooreherd ayaa wuxuu sannado badan ka hor

qoray, oo uu leeyahay, "Warqaddan labaad ee rasuul Butros wax taariikh ah oo la socda ma lahan, oo in rasuul Butros qorayna xaqiqadeeda ma muuqato." Waxaa haddaba taas dhalisay in kuwo badan oo qoraayaal ah ay maankooda u weeciyaan warqaddan, oo markii baaritaan badan la sameeyey ayaa la ogaaday in xaqiiqo ahaan Warqaddan uu qoray rasuul Butros.

Sababtaas aawadeed, Warqaddan labaad ee rasuul Butros waxaannu innagu siinaynaa wakhti yar horudhaceeda, markay joogto ciddii qortay, marka la eego horudhacyada kale ee aynu ka bixinno kutubka kale ee kitaabka Qodduuska ah. Haddaba waxba ka sii faalloon maayo oo sii tafatiri maayo waxyaabaha ay kuwa doodaha ka keena kitaabka iyo qorayaasha kaleba ay ka leeyihiin, iyadoo sidaasi aan u yeelayo inaan ku qanacsanahay in Warqaddan labaad ee rasuul Butros ay qayb ka tahay Hadallada Ilaah.

Waxaana ku badan Warqaddan caddaymo aan farayayayn, oo aragtidaasi iyada ah adkaynaya kor iyo hoos. Haddaba dooni maayo in dadka qaarkii igu eedeeyaan inaan garanaynin su'aalaha laga leeyahay marka ay joogto qofkii qoray. Balse waxaan doonayaa inaan caddaymaha oo dhan idin horkeeno, si looga baaqsado muran iyo doodo aan macno ku fadhiyin. Warqaddan labaad ee rasuul Butros waxay ka mid tahay kitaabka, oo kiniisadduna sidaas ayey rumaysad ilaa iyo bilowgeedii ku qabtay.

Waxaana Warqaddan labaad markii lagu sood aray kitaabka Qodduska ah kaddib, markii laysugu yimid La'odokiya, sannadku markuu ahaa 370. Dabadeed waxaa laysugu yimid Sannadka markuu ahaa 397

kaddib dhalashadii Masiixa, magaalada Kaarteej. Kiniisadduna waxay go'aansatay Warqaddan oo uu qoray rasuul Butros inay qayb ka noqoto kitaabka Qodduuska ah.

Haddaba markii la eego taariikhdii hore ee kiniisadda, ayaa Warqaddan siyaabo kala duwan loo qaadan jiray, iyadoo ay ugu wacan tahay fahamkii kala duwanaa ee wadaaddadii hore ka qaateen Warqaddan labaad ee rasuul Butros. Mid ka mid ah wadaaddadii hore ayaa wuxuu ku daray warqaddan labaad inay qayb ka tahay, kutubta laysku diiddan yahay ama muranka uu ka taagan yahay ee kitaabka. Waxaase aad iyo aad u aqbalay wadaadkii la oran jiray, Oregon, iyo Clement oo isagu ahaa reer Alexandria, oo wuxuuba ka qoray Faallo dheer. Waxaa Warqaddan labaad ee rasuul Butros ku qoran sida rasuul Butros u arko ama u dhigayo dhammaadka dunida. Waxaa kaloo warqaddan soo xigtay ama garanayey rasuul Yuudas, waxaana dareen culus ka muujiyey ragga kala ah, Aristides, Justine Martyres, Arinanos, Egantios, iyo Clemenkii reer Rooma.

Waxaannu og nahay in Martin Luther uu isaguna la dhacay, oo uu aqbalay saxiixnimadeeda. Calvin ayaa isna shaki ka muujiyey, laakiinse ma diidin, waxaase gebi ahaan diiday Warqaddan saxiixnimadeeda Erasmus. Maaddama intaasu tahay taariikh kooban oo Warqaddani labaadi leedahay, haddana sababtii dadka qaarkii ay warqaddan u diideen ayaan caddayn laga bixin.

Waxaa ku qoran caddaymo hoos ahaaneed iyo caddaymo shakhsi ah, sida ku qoran Warqaddan labaad 1:13, iyo 1:16-18 iyo cutubka 3:1, taasoo markaasi aniga ii xaqiijinaysa in warqaddani uu qoray rasuul

Butros. Waxaa Warqaddan labaad ee rasuul Butros la qoray wax yar ka hor intaan la daldalin, oo wuxuu dhintay isagoo ah shihiid, sida ku qoran warqaddiisan labaad 1:13-14.

Warqaddan labaad ee rasuul Butros waa warqad ay saxansaxo udgooni ay ka baxayso, oo waxaa warqaddan la mid ah warqaddii rasuul Bawlos u qoray wacdiyihii dhallinta yaraa ee Timoteyos ahaa. Waxaan garanaynaa in rasuul Bawlos wax badan uga hadlay daldalaaddiisa, welibana wax cabsi ah ma muujin.

Laakiin aad iyo aad buu u doonayey in Masiixa dartiis uu u dhinto, oo gacan ka xaqdarani ay disho. Rasuul Butrosna waa la mid, oo inkastoo dhimashada uu ku dhowaa haddana waxaa Warqaddan ka muuqanaya farxad iyo yididiilo. Haddaba warqaddii rasuul Bawlos u qoray Timoteyos waa tii labaaade, iyo warqaddaanba waxa ku qoran, digniino culus oo looga hortagayo bidcinimada soo socota. Wax lala yaabana maahan in cadowgu ay weerarro kala duwan ku qaadaan Warqaddan labaad. Waayo waa Warqad gaashaan ah oo laysaga daafoco gamuunada kuwa sharka leh ay inagu soo ganayaan. Haddaba isku dhowaanshaha Warqaddan labaad ee rasuul Butros iyo tii rasuul Bawlos ayaa sharraxaysa sida Warqaddii kowaad ee Butros iyo tan labaaadi ay u kala duwan yihiin. Maaddada ama mawduuca lagu adkaynayo Warqaddan way ka duwan tahay tii hore. Kala duwanaanshahana waxaa weeye ama lagu tilmaami karaa kala duwanaantii u dhexaysay Warqaddii rasuul Bawlos u qoray reer Rooma iyo tii uu u qoray Timoteyos.

Warqaddan labaad waxaannu ku arkaynaa in bidcinnimadu ay soo dhowaanayso, iyo in duufaantii

bidcinnimada ama dib-u-dhicii dariiqa Masiixa inay soo dhowaanayso, sidee baanse innaga uga hor tagi karnaa, ama isaga daafici karaynaa dabaylaha kacay ee bidcinnimo? Waa hal sheey sida laysaga daafacayo, 'ayuu leeyahay rasuul Bawlos', waxaana weeye in qofku marka hore uu garto Masiixa. Ma ahan inaad rumaysato oo keliya, laakiin way ahmiyad ballaaran tahay inaad garanayso Ciise Masiix.

Ciise Masiix qudhiisaa leh sida ku qoran Injiilka sida Yooxanaa u qoray cutubka 17:3, markaasoo uu lahaa Sayidkeennu, **"Tanu waa nolosha weligeed ah inay ku gartaan, adoo ah Ilaaha runta ah oo keliya, iyo inay gartaan Ciise Masiix oo ah kii aad soo dirtay."** Markaa waa inaannu Masiixa garanno. Qof waad aqoon karaysaa, laakiin haddana waxbaa kuugu dhinaanaya ilaa aad barato. Masiixa waa inaad barataan, waa in Masiixa la derajeeyo, oo waa in dadka la baraa waxa Ciise Masiix uu ahaa.

Haddii aad tahay dhegaystow masiixi, waa khasab inaad garato Masiixa. Haddaba maaddada ugu weyn ee warqaddani ka hadlayso waxaa weeye, dib-u-dhaca qofka Masiixiga ah uu ka dhoco ama ka gaabiyo Masiixa. Halkee bay aqoontanu ka timid, sidee baanse ku garanaynaa ama ku helaynaa, waa tan laysaga ilaaliyo dib-u-dhacyada? Butros ayaa wuxuu leeyahay, aqoontaas waa inaad garasho weyn u leedahay Hadallada Ilaah, sida ku qoran Warqaddiisii labaad 1:19. Haddaba nolosha Masiixinnimadu ma ahan oo keliya in la masiixiyoobo, waxaase loo baahan yahay in la helo kororsiiyo iyo horumar laga gaaro rumaysadka. Waxaa fure u ah warqaddan 1:18, markaasoo rasuul Butros uu leeyahay, **'Laakiinse ku kor nimcada iyo**

aqoonta Rabbigeenna ah Badbaadiyaheenna Ciise Masiix, isaga ammaanu ha u ahaato haatan iyo tan iyo weligeedba Aamiin." Haddaba waxaan anigu xoogga saarayaa inaan kuwa Masiixa ku koraya quudiyo. Wax kale kuma goodiyo, laakiin waxaan ku quudiyaa Hadallada Ilaah ee waara, waana waxa qof waliba ee Masiixi ah u baahan yahay. Haddaba inta warqaddan labaad uu ku jiro, rasuul Butros wuxuu ku noqnoqonayaa marar badan erayga 'Aqoon'.

Oo wuxuu ku soo noqonoqonayaa ilaa iyo 16 goor. Wuxuu adkaynayaa 'Aqoonta Masiixa' inta uu ku jiro Warqaddan labaad. Waxan haddaba Warqaddan looga hadlayo, hal aayad baa laysugu keenay, waana aayadda u dambaysa ee cutubka 3aad, oo lagu soo qatimayo Warqaddan labaad ee rasuul Butros. Waxaa kaloo jira erayga kale oo lagu yaqaan rasuul Butros waana erayga qaali, oo uu horey dhowr jeer ugu isticmaalay Warqaddiisii kowaad.

Laakiin imminka laba jeer buu isticmaalayaa erayga Qaali. Markii haddaba aynu u kuurgalno warqaddan ayaa rasuul Butros leeyahay, 'Aqoonta aad maqasheen' waxaa weeye in marka hore Masiixa la garto ama la aqoonsado, ama la yaqaanno. Haddaan intaasi ku soo ekayno horudhicii kitaabka, ayaannu dhegaystayaal imminka idiin bilaabaynaa:

CUTUBKII KOWAAD EE WARQADDII LABAAD EE RASUUL BUTROS

Waxaan ku bilaabaynaa haddaba mawduuca looga hadlayo cutubka kowaad, inkastoo weliba aynu garanayno, in mawduuceeda guud uu yahay in **"Masiixa la Garto."** Waxaa rasuulku uu dadka ugu xaqiijinayaa cutubkan kowaad, Masiixinnimada iyo awoodda Qorniinka, iyadoo taasina looga markhaati-

kacayo waxyi kaamilan. Sidaan horeyba idiinku soo sheegay intaannu horudhaca Warqaddan labaad ku jirnay, ayaa warqaddan labaad ee rasuul Butros lagu tilmaami karaan, inay tahay warqad yididiilo iyo farxadi ku dhan tahay, waana hadalkii u dambeeyey ee rasuul Butros u jeedinayo rumaystayaasha, ka hor intaan Iskutallaabta lagu qodbin. Wuxuu uga digayaa dib-u-dhaca ama gadaalu noqoshada ay keeni karaan bidcinnimo ka dhex kici doonta macallimiinta, wuxuuna masiixiyiinta ku adkaynayaa inay rumaysadkooda sal uga dhigaan Qorniinka, oo isagu ah, kan keliya ee duufaannada iyo darbadaha bidcinnimada looga adkaan karo ama looga gaashaaman karo.

Markii aynu eegno 14ka aayadood ee ugu horraysa ee cutubka laad, waxaannu soo saaraynaa aqoonta buuxda ee Ilaah iyo tan Ciise Masiix oo ah Sayidkeenna inay tahay aasaaska dabiicadaha masiixinnimada laga dul-dhisayo. Waxaanan ku horumaraynaa maaddada ah:

NIMCADA MASIIXIYIINTA LA SIIYEE EE KEENAYSA HUBAASHA MASIIXIYIINTA

Haddaan dhegaystayaal idiin bilowno meeriska cutubka 1:1 ee Warqaddan labaad ee rasuul Bturso, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

"Anigoo ah Simoon Butros, oo addoon iyo rasuulba u ah Ciise Masiix, waxaan Warqaddan u qorayaa kuwa helay Iimaan qaali ah oo keenna la mid ah, oo ku helay xaqnimada Ilaaheenna iyo Badbaadiyaheenna Ciise Masiix."

Waxaa haddab aynu arkaynaa in rayga Qaali uu soo geliyey aayaddan durbadiiba. Wuxuuna eraygaas ku soo noqnoqonayaa dhowr jeer markii uu qorayey

Warqaddiisii kowaad. Waana isaga kuwa qoray kitaabka qodduuska ah kan Eraygaas ka isticmaalay. Eraygaas Qaali waa wax lagu aqoonsado ama saxiix lagu garto qoraallada Butros. Wuxuu imminka ku bilaabayaa magaciisa, oo ah Simoon Butros, waa magacii waalidkii ay u bixiyeen.

Laakiin Butros waxaa u bixiyey Sayid Ciise Masiix, waxaana magacaasu ka dhigan yahay dhagax. Labadaas magac ayuu warqaddan labaad u isticmaalayaa, oo Simon wuxuu ahaa ninkii tabarta darnaa, laakiin Butros wuxuu ka dhigan yahay, ninkii xoogga badnaa. Oo ninkii fudaydka badnaa ayaa wuxuu u cuslaaday sidii dhagax oo kale. Hal mid baa kuu soo baxaysa intaan ku jirno Warqaddan, waxaana weeye inuu imminka nin culus noqday.

Wuxuuna diyaar u yahay in Masiixa aawgii loo qodbo. Wuxuu haddaba leeyahay, haddaba tafsiirka aayadda kowaad aan idiin sii wadno, wuxu leeyahay, **"Addoon iyo Rasuul u ah Ciise Masiix."** Haddaba Erayga **'addoon'** wuxuu ka micne yahay mid la soo iibsaday. Marka ay sidan tahay, waxay taas kuu muujinaysaa in rasuul Butros aanu isa-saraysiin ama aanu kor isu qaadin, marka uu leeyahay rasuul ayaa taas ay sharraxaysaa awooddiisa, oo iska dhex saari maayo rasuullada kale, oo wuxuu dareensan yahay inuu mid ka mid ah rasuullada yahay, laakiin ma oran rasuulkii.

Isagoo faallada sii wata ayuu yiri, **"Kuwa helay iimaan qaali ah oo kuweenna la mid ah."** Waxa uu halkan ku leeyahay, waa wax wanaagsan. Marka uu halkan ku isticmaalayo, Erayga Iimaan, wuxuu ula jeedaa runta ama waxa aynu u naqaan **'Injiilka'**. Wuxuu leeyahay, **'Waxaad hesheen Injiilka, oo**

idinkay idin jirtaa waxa aad ka yeelayaan runta laydiin muujiyey ee qaaliga ah.

Waxaa jira firqo ka mid ah masiixiyinta oo rumaysan intaanu qofku masiixi noqon, horey loo doortay, oo markaasi kaddib ayaa Ilaah qofkii siinayaa rumaysad uu runtii ama Injiilka ku rumaysto. Haddaba qayb ahaan waan oggolahay taas. Mararka qaar waxa dadka masiixinnimadu ugu adag tahay waxaa laynoogu caddeeyey Qorniinka, sida ku qoran warqaddii labaad ee reer Korintos 3:15-16, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

"laakiin tan iyo maalintaa, mar alla iyo markii Muuse wax laga akhriyo dabool ayaa qalbigooda saaran, laakiin mar alla markii loo soo leexdo Rabbiga, daboolkaas waa laga qaadaa. Rabbigu waa Ruuxa, oo meeshii Ruuxa Rabbiga joogana waxaa jirta xorriyad."

Waxaan rumaysanahay in nin waliba ee u darban inuu Masiixa raaco, in laga qaadayo ilxaad/ilxidhka saaran qalbigiisa. Haddii qofku uusan Masiixa doonaynin, looma fadhiyo in ilxidhkii ama daahii saarnaa qalbigiisa laga qaado. Ilaah qof waliba ayuu diyaar u yahay inuu badbaadiyo, oo welibana adiga qudhaada ayuu ku badbaadinayaa haddii aad isku dhiibto.

Waxaa Rabbigu uu leeyahay Injiilka sida Yooxanaa u qoray 3:16,

sidatan:

"Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyey wiilkiisa keliya, in mid kastoo isaga rumaystaa uusan lumin, laakiinse uu lahaado nolosha weligeed ah."

Markaa nin waliboo ee Ilaah doonaya inuu u yimaado wuu helayaa, mase ahan in dadka qaar ay leeyihiin sharafta ah inay badbaadayaan oo horey loo doortay. Fursadda waxaa leh nin waliba ee doonaya inuu Ilaah u yimaado. Haddaan casharka ku soo noqonno, ayaa rasuul Butros leeyahay, 'Kuwa helay Iimaan Qaali ah'. Haddaba sidee bay ku heleen iimaanka? Waxay ku heleen xaqnimada Ilaaheenna iyo badbaadiyaheenna Ciise Masiix.

SONG: REEL-----CUT-----

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamijkan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe **(hadahan oo kale)** isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay

nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga
jidhka iyo ruuxaba Aamiin

| P a g e